

THE GP PATIENT SURVEY

Janaayo 2012

Fursadda aad u haysato in aad qaabayso adeegyada Takhtarka Guud (GP) iyo takhtarka ilkaha ee xaafaddaada

Waxaan warqaddan kuugu soo dirayaa si aan kuu weydiiyo fikradcelin lagu wanaajin karo daryeelka caafimaadka iyo adeegyada xaafaddaada. Sahaminta halkan ku lifaaqan waxay kaa waraysanaysaa dhacdooyinka aad kala kulantay xafiiska GP ee xaafaddaada iyo adeegyada kale ee NHS (adeegga caafimaadka qaran) ee xaafaddaada, waxaana weliba lagugu weydiinayaa su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga guud.

Si aad sahaminta uga qayb qaadato fadlan buuxi xogwaraysiga halkan ku lifaaqan oo ku soo celi bokhshadda u diyaar ah. Uma baahnid tigidh boosteed. Si aad nooga caawiso in aannu iska yarayno kharashka fadlan buuxi oo **soo celi xogwaraysiga islamarka ugu suurogal badan** maxaa yeelay waxaannu xasuusin soo diri doonnaa haddii dadku ay ka soo jawaabi waayaan warqaddan ugu horraysa.

Xataa haddii aad xogwaraysi hore u buuxisay, ama aadan dhawaan tagin xafiiska takhtarkaaga guud ee GP, waxaa haddana noo muhiim ah ra'yigaaga.

Jawaabahaaga waxaa gebi ahaan lagu hayn doonaa sir. Natiijooyinka guud ee magac la' oo keliya ayaa loo gudbin doonaa adeegga NHS oo iyagu ma arki doonaan ra'yiga ama macluumaadka bukaanle gaar ah.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan sahaminta waxaad ka helaysaa bogga soo socda. Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta xogwaraysiga, fadlan booqo **www.gp-patient.co.uk** halkaasoo aad weliba internetka kaga buuxin karto sahaminta, ama shirkadda cilmibaarista ee Ipsos MORI ka soo wac telefoonka bilaash ah **0808 238 5388** (Isniinta ilaa Jimcaha, 9ka subaxnimo ilaa 9ka habeenimo; Sabtida 10ka subaxnimo ilaa 5ta galabnimo).

Waad ku mahadsan tahay waqtiga aad na siisay.

Kalsooni

Richard Armstrong
Head of Primary Medical Care
Department of Health

Su'aalaha iyo jawaabaha qaarkood

Waa maxay sababta aannu u qabanayno sahamintan?

Adeegga NHS waxuu ku dadaalayaa in uu wanaajiyo dhacdooyinka bukaanleydu ay kala kulmaan xafiisyada Takhtarka Guud (GP) iyo isticmaalkooda adeegyada caafimaadka ilkaha ee NHS. Sahaminta Bukaanlaha ee GP (GP Patient Survey) ayaa taas lagu cabbirayaa si loogu qaabeeyo habka adeegyada loo fuliyo si ay markaas iyagu ugu sii habboonaan karaan baahiyahaaga.

Miyaad arki kartaan natiiyooyinkayga gaarka ah?

Annagu ma arki doonno jawaabahaaga gaarka ah – waxaa adeegga NHS loo gudbin doonaa oo keliya natiiyooyinka oo magac la' la iskuna daray. Haddii aad ka jeceshahay in aadan ka jawaabin su'aalaha qaarkood fadlan iyaga ku dhaaf jawaab la'aan laakiin buuxi xogwaraysiga intiisa kale. Buuxinta xogwaraysiga ikhiyaar ayaad u leedahay laakiin waxaannu rajaynaynaa in aad ka qayb qaadan doonto.

Halkeen ka helnay magacaaga iyo cinwaankaaga?

Shirkadda Ipsos MORI waxay xogwaraysigan kuugu soo diraysaa magaca Wasaaradda Caafimaadka. Magacaaga waxaa si kalasooc la'aan ah looga soo doortay liiska adeegga NHS ee bukaanleyda qoran Takhtar Guud (GP). Shirkadda Ipsos MORI waxay sir ku hayn doontaa macluumaadkaaga xiriirka waxaana iyaga loo isticmaali doonaa si xogwaraysigan laguugu soo diro.

Marka sahaminta la dhammaystiro, shirkadda Ipsos MORI waxay baabi'in doontaa macluumaadkaaga xiriirka ee shakhsi ahaaneed. Shirkadda Ipsos MORI looma sheegin warbixin ku saabsan caafimaadkaaga.

Haddii aad dhibaato kala kulanto buuxinta xogwaraysiga, ama aad rabto in aad kaas ku codsato farta Braille ee dadka indhaha la' ama far waaweyn soo wac telefoonka bilaash ah 0808 238 5388 ama booqo bogga internetka oo ah www.gp-patient.co.uk